# Saacadda Biyaha Iyo Korontada ee La Wadaago

Shared Utility Meters

## Waa maxay Saacadda Biyaha Iyo Korontada ee La Wadaago?

Saacaddu waxa ay cabirtaa imisa ayaad isticmaashay korontada, gaaska iyo biyaha. Saacadda la wadaago waa saacad kaligeed ah oo loogu talo galay 1 guri ama qol, iyo dhulka dibadda ka ah gurigaas. Dhulkaas ka baxsan waxa uu noqon karaa qol kale ama guri kale oo ka tirsan dhismaha ama guryaha isku xiran.

Tusaale saacadda la wadaago: dhisme ay hal saacad wadaagaan 2 guri, ama saacad 1 guri leeyahay oo lagu xisaabo dhismaha hoose oo dadka oo dhan uu wadaago. Haddii aad hubin in saacadaada lagula wadaago, weydii shirkaddaha biyaha iyo korontada in ay fiiriyaan oo kuu sheegaan.



## Magacee lagu soo qorayaa biilka? Sidee loo bixinayaa?

Sharciga Minnesota waxa uu dhigayaa in kireeyaha uu mas'uul ka yahay bixinta biilasha saacadda la wadaago.

Biilka saacadda la wadaago laguma qori karo magaca kireystaha, marka laga reebo hal xaalad oo kaliya.

Ma aha in aad bixiso kharashka korontada iyo biyaha xisaab ku qoran magaca kireeyaha, oo ay ku mid yihiin saacad la wadaago.

Laakiin, haddii uu kireeyuhu aanu bixin biilka oo shirkadaha korontada iyo biyahana doonayaan in ay xiraan, waxaa laga yaabaa in aad ku khasban tahay in aad bixiso qeyb biilka ka mid ah si aan loo joojin adeegga. Haddii ay taasi dhacdo, lacagta aad bixisay waxa aad ka jari kartaa kirada soo socota (akhri hoos - Maxaan Yeelayaa Haddii Aanu Kireeyaha Bixin Biilashaha Oo La I Siiyo Ogeysiis In La Jarayo Ah?) La xiriir shirkadaha korontada iyo biyaha haddii aad aaminsan tahay in aad bixiso biilka saacad la wadaago.

Waxaa jira habab kala duwan oo aad ku bixin karto qeybtaada biilka ee saacad la wadaago. Kharashka korontada iyo biyaha waxaa la raacin karaa heshiiska kirada, ama waxa aad kireeyaha weydiisan kartaa in aad bixiso qeybta kaaga soo beeganta biilka haddii aan lacagta kirada lagu darin.

## Kireeyaha waxa uu doonayaa in aan gaar u bixiyo saacad la wadaago. Waa maxay sharciyada arrintan ka yaala?

Haddii uu heshiiska kirada dhigayo in aad kireeyaha si gaar ah oo ka baxsan kirada kharashka saacad la wadaago, sharciyo ayaa ka degsan.

- Haddii aad gaar u bixinayso korontada, waa in lagu qoraa taas heshiiska (lease) guriga. Waxaa loo baahan yahay inay jiraan warqad gaar ah oo ku lifaaqan heshiiska (lease) oo sharxaysa sidda kharashka loo xisaabiyo.



- Sharciga Minnesota waxa uu dajiyaa jid lagu qaybiyo kharashka oo xaq ah. Sharcigu waxa uu yiraa mas'uul kama tihid kharashaadka korontada ee meelaha dhadka ka dhaxeeya, meelaha ay isticmaalaan qoladda gurigu ama guryaha banaan.


Mas'uul kama tihid biyaha loo isticmaalo ilaalinta bilicda dhismaha (sidda waraabinta cawyska), ama meelaha ay isticmaalaan kiraystayaasha oo dhan, sidda qololka dhar qasaalida.

- Waa in ay ku caddahay heshiiska kirada, **haddii aad weydiisato**, waa in kireeyuhu ku siiyaa nuqul (koobi) biilka korontada iyo biyaha ee dhismaha iyo nuqul muujinaya sida loo qeybiyey.
- **Haddii aad weydiisato,** qoladda gurigu waa khasab inay kaa siiso nuqulo kharashaadka dhabta ee korontadda ee 2 dii sanno ee la soo dhaafay.
- Haddii aad dib ula dhacdo bixinta kharashaadka korontada, qoladda gurigu waa khasab inay kuugu baaqdo qorshe tartiib-tartiib u bixin ah. Qorshahu waa inuu ku salaysnaadaa waxa aad awoodo inaad bixiso. Laakiin waa inaad u sheegto qoladda guriga waxa xaaladaaddu tahay. Haddii uu jiro khilaaf ku saabsan cadadka bixinta lacagta, waxa aad la hadli kartaa Gudoomiyaha Korontada Dadweynaha [Public Utilities Commission (PUC)] si aad caawimaad uga hesho. Ka wac isaga khadka ah 651.296.0406 ama ka xareyso ashtako ku saabsan dhibka bartaconsumer.puc@state.mn.us.
- Haddii aad la soo daahdo qoladda gurigu kuguma soo dalici karto wax ka badan $5 oo khidmad la soo daahid ah markiiba. Xataa haddii aad in ka badan 1 kharash oo koronto aad gaar u bixiso.
- Qoladda gurigu waxay soo dalici kartaa 'khidmad hawsha kharashka.' Taasi ma ay noqon karto wax ka badan $8 markiiba. Xataa haddii aad in ka badan 1 kharash oo koronto aad gaar u bixiso.
- 30Ka Siteembar ee sanad kasta, waa in kireeyuhu qoraal kuugu sheegaa Barnaamijka Gargaarka Degdegga ah ee Tamarta. Macluumaadka lagu siinayo waa inuu ku jiraa telefoonka lacag la'aanta ah ee xaaladaha degdegga ah.

## Maxaan yeelayaa haddii aan bixinayo saacad la wadaago, laakiin ay aheyd in aanan bixin?

Haddii uu magacaaga ku qoran yahay biilka saacad la wadaago, waa in kireeyuhu bixiyaa. La xiriir shirkadda korontada iyo biyaha sida ugu dhaqsaha badan una sheeg dhibaatada. Waxa aad dacweyn kartaa mulkiilaha si aad lacagtaada uga soo ceshato. Codsigaaga waxaa ka mid noqon kara $500 ama 3 laab lacagta aad bixisay, hadba kii badan. Waxa kale oo aad qaaliga weydiisan kartaa in kireeyaha la amro inuu la wareego mas'uuliyadda biilka.

Xisaabta keydka ee Kirada ayaa ah nooc ay maxkamaddu amri karto in laguxaliyo dhibaatada. Ugu yaraan 14 cisho ka hor inta aadan dacwadda diiwan gelin, waa khasab inaad siiso qoladda guriga aad uga jirto ogaysiis qoraal ah oo ku saabsan saacada la wadaago, waxa aad bixisay, iyo fursad wax looga qabto arinta. Nuqul ka reebo ogeysiiska aad siisay kireeyaha. Haddii 14-cisho ay ka soo wareegto ayna qoladda guriga aad uga jirtaa aysan ku qorin magacooda biilka ama aysan sameyn saxitaanadda loo baahan yahay, waxa aad xareysan kartaa dacwo kiro rahmid ah. Waxa kale oo aad shirkadaha korontada iyo biyaha iyo kormeeraha guryaha wargelin kartaa kireeyaha iyo saacadda la wadaago. Kormeeraha ayaa u qabanaya muddo go'an kireeyaha. Haddii taariikhda la dhaafo waxa aad maxkamadda u gudbin kartaa codsi ah in la furo xisaabta keydka kirada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xisaabta kirada keydka, ka akhriso xogta urursan ee *Ka Helida Qolada Gurigu Inay Hagaajiso Wixii Halaysan*.



## Qoladda gurigu ma iga jari kartaa korontada?

Maya. Qoladda gurigu ma jari karto adeega korontada ee saacadeeda la wadaago, xataa haddii aad la soo daahdo bixinta biilkaaga. Laakiin qoladda gurigu waa ay kaaga saari **karaan** guriga bixin la'aanteeda maadaama ay xadgudub ku tahay heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay.

**Ogow:** Guriga lagaagama saari karo bixin la'aanta biilka kulaylinta 'Xilliga Cimiladda Qabow.' Oktoobar 1 keeda ilaa iyo Abriil 30 keeda. Sidoo kale guri lagaama saari karo bixin la'aanta korontadda haddii cid gurigaaga joogtaa ay ugu baahan tahay korontadda (kulaylka, korontadda) sababo caafimaad ama xaalado degdeg ah awgood.

LAAKIIN, labada xaaladoodba, waa inaad la sameysato qorshe lacag bixin ah qoladda korontada si aad u bixiso waxa lagugu leeyahay.

## Ka waran haddii qoladda gurigu ay isku daydo inay guriga iiga saarto bixin la'aanta biilka saacada la wadaago?

Haddii aad ka xareysay ashtako hay'adda PUC ku saabsan adeeg gaas ama koronto, guri ka saaridda horey uma socon karto ilaa iyo inta ashtakadda ay xal ka gaarayso hay'adda PUC. Ilaa inta laga xalinayo, maxkamaddu kuma ay waydiin karto inaad siiso wax lacag ah maxkamadda ama qoladda guriga.

Haddii aad tahay qof danyar ah ma aha inaad siiso wax lacag ah maxkamadda ama qoladda guriga xataa haddii aadan ka xareysan dacwo hay'ada PUC, laakiin kiiska guriga ka saaridda ahi horey waa uu u socon karaa.


Haddii aysan jirin ashtako hay'adda PUC laga xareeyey, aadana ahayn qof danyar ah, kolkaa maxkamaddu waxa ay oran kartaa waa inaad u dhiibto lacag maxkamadda laakiin kaliya uun ah cadadka ay maxkamaddu u malaynayso in biilkaagu uu noqon doono wixii markaa ka dambeeya.

## Maxaa dhacaya haddii aanu kireeyuhu bixin oo ogeysiis in la jarayo aan helo?

Haddii uu ku soo gaaro ogeysiiska in la jarayo korontada yo biyaha ku soo gaarop oo kireeyuhu aanu bixin, waxa aad maxkamadda ka diiwaan gelin kartaa amar degdeg ah oo aad ku codsabeyso in mas'uuliyadda lagaa daayo. Waxa kale oo lagu magacaabaa amarka degdegga ah ee ka dhaafidda mas'uuliyadda kireystaha (ETRA). Gaarsii kireeyaha ogeysiis 24 saac ka hor dhibaatada, iyo in aad dooneyso in aad dacwadka diiwaan geliso maxkamadda.

Xog ururusan, *Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdegga Ah* oo aad ka helikarto macluumaad dheeraad ah.

Waxa kale oo aad kireystaha siin kartaa ogeysiis 48 saacadood ah oo qoraal ah in aad dooneyso in aad maxkamadda dacwad ka diiwan geliso. Ogeysiiska qoraal ahaan ugu dir kireeyaha oo nuqul (koobi) ka reebo. Ka dib marka aad bixiso biilka, waxaa lagaa doonayaa in aad nuqul ka mid warqadda lacag bixinta u dirto mulkiilaha.



**Ogow:** Kaliya waxa aad u baahan tahay inaad bixiso biilka markaa. Khasab ama aha inaad bixiso wax lacag ah oo shirkadda korontaddu ay qoladda guriga horey ugu lahayd ama wax khidmad dabaaji ah ama dib u soo furid ah.

Macluumaad kale oo dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa xog ururusan, *Goynta Korontada Kolka Lacagta lagu leeyahay Qolada Gurga*.

## Maxaan yeelayaa haddii aan bixiyo saacad la wadaago ee meel horay u daganaa?

Haddii aad guri ka guurtay aad horey u bixin jirtay lacagta saacad la wadaago oo aheyd inuu bixiyo kireeyaha, waxa aad dacwad ka diiwaan gelin kartaa Maxkamadda Dacwadaha Madaniga Ah. Uma baahnid qareen haddii lacagta aad u dacwooneyso ay dhan tahay $15,000 ama ka yar. Haddii ay lacagtu ka badan tahayintaas, waxa aad ka dacwoon kartaa maxkamadda degmada.

Akhri xog ururusan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**